

## **WARMURTIYEEDKA GUDDIGA WADJIRKA EE AMAANKA**

**Nairobi, 7 – 8 Agoosto, 2010**

1. Guddiga Wadajirka ee Amaanka (JSC) ayaa kulan yeeshay 7-8dii bishan Agoosto, oo ay wada shirguddoominayeen Ra'iisal Wasaaraha Soomaaliya Cumar Cabdirashid Cali Sharmaarke iyo Ergeyga Gaarka ah ee Xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay, Md. Augustine P. Mahiga.
2. Dowladda Ku Meel Gaarka Soomaaliya (TFG) waxay mar kale xaqiijisay in Guddigu uu yahay hay'adda kowaad ee u xilsaaran isuduwidada dibuhabaynta laamaha amniga.
3. Waxaa doodaha loola dan lahaa in la helo hannaan ku salaysan waxqabad iyo horumar la taaban karo, oo taabanaya dhinacyo dhowr ah, oo ay ka mid yihiin taageero la siiyo Ciidamada Amaanka Soomaaliyeed, Booliska iyo Wasaaradaha Amniga.
4. Guddigu wuxuu ansaxiyay talooyinka ay soo jeediyeen labadiisa koox shaqo: Kooxda Shaqada Farsamo ee Mileteriga (MTWG) iyo Kooxda Shaqada Farsamo ee Booliska (PTWG) si ka muuqata Lifaaqa I iyo II.
5. Guddigu wuxuu Dowladda TFG ugu baaqay inay qaaddo tallaabo degdeg ah si ay awooddeeda ugu fidiso Soomaaliya sarena ugu qaaddo kalsoonida ay ku leedahay dadweynaha Soomaaliyeed.
6. Guddigu wuxuu Dowladda TFG ugu baaqay inay qaaddo tallaabooyin toos ah oo degdeg ah si ay hore u sii waddo horumarinta laamaha amniga, oo ay ka mid tahay mas'uuliyad maaliyadeed, oo ay sii waddo dardarta lagu raadinayo taageero caalami. Si taa loo helo, Guddigu wuxuu ku baaqayaa in muhimadda la siiyo ansaxinta Qorshaha Amaanka iyo Xasillooninta Qaran iyo in dib loo eego si degdeg ahna loo ansaxiyo Qiimeyntii lagu sameeyay Laamaha Amniga lana hirgeliyo talooyinkii la soo jeediyay.
7. Guddigu wuxuu Dowladda TFG ugu baaqay inay sii waddo dadaalka ay ugu jirto sidii loo taageeri lahaa dhismaha hay'adaha laamaha amniga.
8. Guddigu wuxuu ammaanay dadaalka ay sameeyeen Golaha Wasiirrada iyo Shirmadaxeedka Ururgoboleedka IGAD, laguna ansaxiyay Golaha Midowga Afrika, ee ku saabsan xoojinta Laamaha Amniha Dowladda TFG iyo AMISOM.
9. Guddigu wuxuu ammaanay hindisaha cusub ee ay Dowladda Maraykanku ku abaabulayso kharash lagu taageero Dowladda TFG iyo AMISOM, wuxuuna ammaan iyo mahad u soo jeediyay dhammaan deeqbixiyeyaasha hadda deeq bixiya wuxuuna ku dhiirrigelinayaa dowladaha iyo hay'adaha kale inay taageero sidaan oo kale ah bixiyaan.
10. Guddigu wuxuu Qaramada Midoobay ku dhiirrigeliyay, isagoo uu ka wakiil yahay Xafiiska Siyaadda u qaabilsan Soomaaliya (UNPOS, isagoo la kaashanaya Midowga Afrika, inay kaalin horseed ah ka cayaarto abaabulka kharash laga soo ururiyo Bulshada Caalamka oo lagu taageero Dowladda TFG iyo AMISOM.

11. Guddigu wuxuu soo dhoweeyay ballanqaadka ay AMISOM mar labaad ku ballanqaadday inay qaaddo tallaabooyin dheeraad ah si loo xaqiijiyo badbaadinta dadka rayidka ah.
12. Guddigu wuxuu AMISOM ku ammaanay adeegyada asaasiga ah ee ay dadka rayidka ah u fidiyaan, sida kaalmada caafimaad.
13. Guddigu wuxuu soo dhoweeyay ballanqaadka ay AMISOM mar labaad ku ballanqaadday inay tababar iyo hagd siiso ciidamada Dowladda TFG iyo dadaalka ay ugu jirto inay markii ugu horeysay Muqdisho ka sameeyso aag amaan ah wuxuuna ku talinayaa in bulshada caalamku si tartiib tartiib ah xafiisyadeeda Muqdisho ugu celiso.
14. Guddigu wuxuu ammaanay dadaalka ay Qaramada Midoobay, isagoo uu UNSOA ka wakiilka, ugu jirto taageerada hawlgalka ciidanka AMISOM.
15. Guddigu wuxuu mar kale xaqiijinayaa inay ka go'antahay badbaadinta dadka rayidka ah, si arrintan loo hirgeliyana wuxuu ku nuuxnuuxsanayaa arrimahan:
  - i. Dhammaan dadka rayidka ahi waa in la badbaadiyo – gumaadka kooxaha dagaalka wada u geystaan dadka rayidka ahna waa in la daboolka laga qaadaa.
  - ii. Baahida loo qabo in la badbaadiyo dadka rayidka ah oo ay ka midyihiin dadka maatada ah iyo kooxaha liita iyadoo taasi ay ka midtahay hawlgalka booliska ee ilaalinta kala dambeynta.
  - iii. Ciidamada oo la siiyo tababar ku habboon, xog ururin, qalab hawlgal oo ku habboon iyo ku dhaqanka sharciyada dagaalka ee waafaqsan sharciga caalamiga si la isaga ilaaliyo in waxyeello loo geysyto dadka rayidka ah ee colaaddu ku timaaddo.
  - iv. Fududaynta gargaarka baniaadanimoo oo dadka la gaarsiiyo iyo nabadgelyada shaqaalaha gargaarka.
16. Guddigu wuxuu dibueegid ku sameeyay oo ansaxiyay Shuruudaha Shaqadiisa oo wax laga beddelay wuxuuna isku afgartay inuu hawlgeliyo laba Koox Shaqo Farsamo oo kale – Kooxda Shaqo Farsamo ee Horumarinta Laamaha Amniga iyo Caddaaladda iyo Kooxda Shaqo Farsamo ee Qorsheynta Istaraatiga iyo Barnaamijyada. Guddiga Wadajirka ee Amniga (JSC) wuxuu kaloo isuduwi doonaa shaqada Guddi Hawleedka La Dagaallanka Burcad Badeedda (Geeddi Socodka Kampala).
17. Guddigu wuxuu Dowladda TFG iyo Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda (UNPOS) ku ammaanay qabanqaabada kulanka ay ka soo baxeen natiijooyin faahfaahsan oo waxtar leh.
18. Guddigu wuxuu go'aansaday inuu si joogta ah u kulmo, isagoo lagu taageerayo diyaargarow farsamo.

8 Agoosto, 2010